



Mashruuca kor u qaadista inta aad kala qabsaneysid shaqada dadka qoxootinimada loo aqoonsadey iyo dadka si ku meel gaar ahaan loo ogolaadey

## Qiimeyn shaqo




**Fachstelle Integration Graubünden**, Grabenstrasse 1, 7001 Chur

 Fachstelle Integration Graubünden  
Post specialisà per l'integraziun dal Grischun  
Servizio specializzato per l'integrazione dei Grigioni



## Somalisch

Grabenstrasse 1  
7001 Chur

 081 257 26 38

[www.hallo.gr.ch](http://www.hallo.gr.ch)  
[www.fluechtlinge.gr.ch](http://www.fluechtlinge.gr.ch)



## Ujeedo

- Baro waxyaalaha aasaasiga u ah ee ku taxluqa shaqaalaha iyo shaqada «sida looga shaqeeyo wadanka iswiserland»
- In aad ogaato ama aad tijaabiso awoodaada shaqo wixii aad soo baratay intii lagu guda jiro mashruucaan oo wixii kaa qaldan ama aad aqoonin aad geliso waqti dheer
- Dub u eegid ku samee warbixintii ama warqaddii cadeynta ahayd ee shirkadda ku soo siisey iyo arajida shaqada loo qorto iyo wixii kale ee aad haysatid oo in aad shaqo hesho kaa caawin kara
- Talaabada kuugu xigta aad qaadeyso kala tasho la taliyahaaga si aad si wadajir ah ugu falaqaynsann ka dibna halwado u qorsheysaan

## Inta ay soconayaan koorsooyinka

1. usbuuc; casharada ama daruusta caadiga
2. ilaa 3. usbuuc; shaqooyinka gacanta laga qabto  
> Tusaale ahaan kushiinka ama qofka cuntada karinaaya, qofka cuntada dadka u geeygeeynaya ama (kapelyeeri), shaqaalaha nadaafadda ku shaqo leh, warshadaha ama kuwa ka shaqeeya biraha-/kuwa ka shaqeeya qoryaha ama alwaaxda qora

## Qiimeyn shaqo

## Fursadaas lagu siiyey waxaa lagaaga doonayaa natiijo la taaban karo (miro dhal ah)

- In aad barato shaqooyin kala duwan oo kala jaad ah sida loogu shaqeeyo
- In aad is qiimeyn isku sameyso waxaad ku xuntahay ama aad ku fiicantahay
- Baro awoodaada ama kartidaada gaarka ah ee shaqo inta ay la, egtahay
- Baro shaqooyinka proseeskooda iyo sida xawliga ay ku socoto shaqadaas

## Waxyaalaha soo socda ayaad sameynkartaa

Qofka kuu ah lataliye ama kaa caawinaaya shaqada waxay shirkadda aad tijaabada aad ku soo sameysay u soo dirayaan warqad cadyn ah sida aad shaqada ku ahayd, kartidaada iyo dadaalkaada shaqo iyo waraaqo lagu lifaaqayo aaraajida shaqo raadinta iyo weliba qorshe ku saabsan shaqadaada.

Wadahalka adiga iyo lataliyahaaga xaga shaqada wuxuu ku salaysan doonaa hadba ja-waabta ama qoraalka ay shirkaddu kaa soo gudbisoo ee ku saabsan tijaabadii shaqo ee aad soo sameysay (qiimeyn) iyo mustaqbalka waxaa ku aadan ee aad qaban doontid.

